

Maamulka Carruurta Oggolaanshaha Daryeelaha Children's Administration Caregiver Authorization

TAARIIKH

Tani waa in lagu xaqiijiyo in _____, dhashey _____, lagu meeleeeyay daryeel korriin iyada oo kormeerayso Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada ee Gobolka Washington (DSHS), Qaybta Adeegyada Qoyska iyo Carruurta (DCFS). Shaqaalaha maamulka kormeeridda waa:

- Xabsiga Booliska.
- Lambarka Amarka Maxkamadda _____.
- Heshiiska Maaleynta Iskaaga ah, taariikhdiisu tahay _____.

DSHS waxay oggolaatey in lagu meeleeeyo dhallaanka kor lagu magacaabey guriga _____, dhaqangal ah _____. DSHS waxay wakiilaneysaa daryeel-bixiyeha(yaasha) xagga sare lagu soo magacaabey in ay ugu qaybgalaan waxqabadyada lagu muujiyay hoose:

Daryeelka Ilkaha iyo Caafimaadka ee Joogtada ah

Ka qabanqaabi daryeelka ilkaha iyo caafimaadka adiga oo matalaya dhallaanka takhtar shati haysta, kalkaaliye caafimaad ama takhtarka ilkaha. Daryeelka joogtada ah waxaa ka mid ah Baaritaanka xilli-xilliga ah eee Waqtiga Hore, Baarista Cudurka, iyo baaritaanka daaweynta 30 maalmood gudahooda ee meelaynta bilowga ah iyo tallaalada sida loo baahan yahay. Daryeelaha waa in uu kala hadlo baahiyada daryeelka joogtada ah shaqaalaha bulshada DSHS ee loo xilsaarey ee ku daraya baahiyada daryeelka joogtada ah qorshaha adeegga qoran ee dhallaanka.

Caafimaadka Dhimirka iyo Adeegyada Maandooriyaha iyo Daaweynta

U-qabanqaabi qiimeynta caafimaadka dhimirka iyo maandooriyaha iyo daaweynta sida loo baahan yahay ee la farey.

Bixinta Daawooyinka Dhakhtaka Soo Qora iyo Kuwa La Iska Soo Gato

Bixi daawooyinka loo qorey dhallaankan sida uu ku tilmaamey bixiyaha daryeelka caafimaad warqadda dhallada daawada. Isticmaal digtoonaa macquul ah si aad u bixiso daawooyinka "la iska soo gato" ee lagu qoray WAC 388-148-1575 (laga helay <http://app.leg.wa.gov/WAC/default.aspx?cite=388-148-1575>) iyo 388-145-1860 (laga helay <http://apps.leg.wa.gov/wac/default.aspx?cite=388-145-1860>).

Daryeelka Ilkaha iyo Caafimaadka ee Degdega ah

Isku duwidda iyo oggolaanshaha, la'aanta ogeysiiska hore ee shaqaalaha loo xil-saarey, daryeelka caafimaadka degdegga ee noocas ah ee daruuriga u ah ka hortaga dhimashada ama dhaawaca halista ah ee ku yimaada dhallaanka. Xaaladaha aanan ogeysiis hore la bixinin, daryeel-bixiyaha wuxuu ku wargelinayaa shaqaalaha loo xil-saarey sida ugu dhaqsiiyaha badan ee suurtagalka kadib marka la buuxiyo baahiyada caafimaadka dhallaanka.

Go'aanno Waxbarasho

Ku diiwaangeli dhallaanka dugsi waxaadna gaartaa go'aannada waxbarasho ee joogtada ah adigoo matalaya dhallaanka.

Safarka Ka Baxsan Gobolka ee ka Badan 72 saacadood

U-qaad dhallaanka dibadda Gobolka Washington inta lagu guda jiro muddada _____ illaa _____. Ogeysiiska hore ee safarkan waxaa la siiyey shaqaalaha loo xilsaarey dhallaanka iyo oggolaanshaha safarka noocas ah waxaa lagu diiwaangeliyaa diiwaanka kiiska dhallaanka. *(Ee Habdhaqanada Maamulka Carruurta iyo Habraacyada 6100)*

Fadlan xorriyad u dareen in aad kala xiriirto shaqaalaha DCFS ee loo xilsaarey _____ haddii aad qabto su'aalo dheeraad ah.

MAGACA SHAQAALAHA DCFS (QORAN)

MAGACA KORMEERAHA DCFS

LAMBARKA TELEFOONKA KORMEERAHA DCFS

Waxaa habboon daryeelaha xagga sare lagu magacaabey in uu helo iyo in uu wadaago macluumaadka loogu baahan yahay si loo gaaro caafimaadka degdegga ah iyo midka joogtada ah ee la xiriira baahiyada dhallaanka. Macluumaadkan wuxuu waafaqsan yahay shuruudaha HIPPA (Qodobka Sharciga La-Xisaabtanka iyo Caymiska Caafimaadka ee La Qaadi karo).

Haddii ay jiraan su'aalo ku saabsan daaweynta ama adeegga la qoray, bixiyaha caafimaadka ama farmashiilaha waa in uu **kala xiriirto shaqaalaha DCFS ee loo xilsaarey _____ isla-markiiba**. Ma habboona in la diido adeegyo ama in la raadsado oggolaansho waalid. Sameynta sidaan waxay xal dhex-dhexaad ah ka sameynaysaa badbaadada iyo qarsoodi ahaanta dhallaanka.

Waalidka korinaya ama daryeelaha qaraabada ah ee dhallaankan maaliyad ahaan mas'uul **KAMA** ah wixii adeegyo ah ee la xiriira caafimaadka. Carruurta ku jirta meelaynta guriga dibaddiisa ah waxay u-qalmaan Barnaamijka Caymiska Daryeelka Caafimaad ee Gobolka Washington. Gobolka Washington wuxuu sidoo kale la leeyahay heshiisyo celin gobolo badan oo loogu talagalay caynsanaanta caymiska daryeelka caafimaad inta dhallaanka uu joogo dibadda Gobolka Washington.

Si loo xaqiijiyo u-qalmitaanka Daryeelka Caymiska Caafimaadka, lambarka ProviderOne ee dhallaanka, ama baaxadda caynsanaanta, fadlan kala xiriir Kooxda Caafimaadka Daryeelka Korineed ee Gobolka Washington 1-800-562-3022 khadka taleefoonka gaarka ah. 15480, Isniin illaa Jimco, 7:30 AM illaa 5:00 PM (Waqtiga Basiffiga) Bixiyeyaasha Caafimaadka waxay xaqiijin karaan u-qalmitaanka ayagoo eegaya Nidaamka Halka Bixiye ee HCA

<http://hrsa.dshs.wa.gov/providerone/providers.htm>

Ku guuri galka kiiska.